



HOUSING AFFORDABILITY
AND LIVABILITY AGENDA



1. Housing Options

Encourage a wide variety of housing options, including family-sized units and not just one-bedroom and studio units.

** WE AGREE*

neighborhood

HOW!

diversity of housing types (not just 1 or 2 bedrooms) - (Champion for smaller multifamily)

neighborhood manager - mix of units

mentoring & incentives for others

Is family success or investment? Rent-stabilize? Day care?

Questions for discussion:
How might this principle advance or hinder race and social justice across Seattle?




Hadafka HALA waa iney abuurto 50,000 guryo cusub 10ka sano ee soo socda.

+30,000

QAYABHA LOO QIIMEEHA SUUQA EE QAALIGA

Quryaha qiimaha suuqa ee qaaliga waxey kordin doonaan quryaha ee Seattle, tirade iyo kala duwanaanta eh ee doorashooyinka guryaha.



WHY HALA?

“Aragtideydu waxay tahay in dadka magaalada ka shaqeeya ay awoodaan iney isla markaa ku noolaan karaan halkan. Guryo la awoodo qiimahooda waa hal tiir oo asaasi u ah in magaaladu ahaato mid loo siman yahay. Waa arrin la saan qaadeysa dadaalkayaga ku wajahan in la kordhiyo lacagta ugu yar ee lagu shaqeyn karo (minimum wage), inaan siinno caruurta dhaqaalahooda hooseeya waxbarashada ka horreysa iskuulka, iyo inaannu kordhinno in qeyb lagu yeesho beeraha nasiinnada iyo gaadiidka dadweynaha. Waa xil dhammaan ina saaran sidaannu Seattle uga yeeli laheyn magaalado la awoodo in lagu noolaado. Si wadajir, qorshahani waa mid halkaa inoo wada.”

- Duqa Magaalada Ed Murray

+20,000

QAYBAHA LA AWOODI KARO

Qaybaha la awoodi karo in la sii hayo doono qoysaska dakhligoodu yaryaha. Dhisitaanka qaybaha la awoodi karo waxey u baahan doontaa soo-saarka ee quryaha la awoodi karo sanadkii saddex-jibir.



Qayabha:

- 1) Hantida Maalgashiga, 7,500;
- 2) Lagama maarmaanimada Guryo La Awoodi Karo (MHA), 6,000+;
- 3) Joogteynta Cafinta Canshuurta Guryaha, 3,300;
- 4) Ka Cafinta Canshuurta Dhismayaasha Cusub ee Guryaha Dhowrka Qoys, 2,100;
- 5) Dhulka Hantida Guud/Dhismaha Qorsheysan ee Degmooyinka Cusub, 1,100

- + Baahida loo qabo guryo dheeri ah, gaar ahaan kuwa la awoodi karo, heerkii ugu sareysay taariikhda ayey mareysaa
- + Seattle waxa ay leedahay taariikh fog ku leedahay taageerida guryo la awoodi karo oo loo maro Canshuurta Guryaha iyo siyaabo kale. HALA waxa ay siyaado ku tahay dadaalkaasi iyadoo si ballaaran shabaqa ugu si loo horumariyo waddooyin lagu abuurto ama lagu dayac-tiri karo guryo dadka oo dhan u dhaxeeya.
- + Waan ognahay in kordhinta guryo tayadoodu sareyso, la awoodi karo oo ku dhow halka basaska iyo tareenka laga raaco iyo meelaha kale ee muhiimka ah ay magaaladeendu ka dhigeysa mid lagu noolaan karo
- + Reer Seattle waxa ay doonayaan in magaaladooda ahaato mid awoodid iyo soo dhoweynta dadka oo dhan u siman yihiin.
- + Seattle waxa ay ballaarineysaa xarumaha bulshada, waxbarashada dugsiyga ka hor, beeraha nasiinada iyo hantiyada kale si ay u buuxiso baahida dadweynaha koraya.
- + Reer Seattle waxa ay ansixiyeen canshuurta baabuurta oo taariikhi ah sannadkii 2015 taasi oo sii horumarin doonta dhammaan wadiiqooyinka lagu heli karo gaadiidka iyadoo gaar ahaan xoogga la saarayo socodka, baaskiillada, iyo gaadiid dadweyne wixtarkiisu sarreyso.

Guulaha (quulihii) taariikhda (ilaa hadda)

GURYAHA EE SEATTLE LEVY

Cusbooneysiinta iyo ballaariintii codeeyeyaasha Seattle canshuurta hagaajinta guryaha markii shanaad waxay muujisay taageerada loo hayo guyo la awoodo. Ansixintani waxey oggolaan doontaa in la abuurto markey u yar tahay 900 oo guryo la awoodo ah.

DIFAACIDDA KIREYSTAYAASHA

+ Heyb kala Soocidda ku Saleysan Halka Dakhliga ka Yimaado

Ballaarinta xeerka Guryaha Furan ee hadda jira si looga hortago midab kala sooc ay qolyaha guryaha leh kula kici karaan kirystayaasha dhaqaaladoo hooseeyo kuwaasi oo laga yaabo in ilo sugan oo kala duwan dakhli ka soo galo sida dakhliga Taageeridda Cunugga, Soosha Sakuuriti, iyo hababka kale oo dowladdu dadka ku caawinto.

+ Difaacidda Kireystayaasha

Iyadoo la anxiyey sharcigii cusbaa kaasi oo weli wax u taraya xuquuqda kireystayaasha kana difaacaya aar goosi kaga yimaada milkiilayaasha guryaha sida kordhinta kirada guyo heerkoou hooseeyo.

+ Xoojinta Caawimadda Dib u Dejinta oo la Ansixiyey

Ansixintii Xeerka xoojinaya sharcigeena imika jira ee ah Sharciga Caawinta Kireystaha Guuraya (Tenant Relocation Assistance Ordinance), kaasi oo lagu maalgeliyey hanti dhan 500,000 oo doolar oo ku timid is afgaradkii Sisely oo ku jeeday in lagu kharash gareeyo waxbarashada iyo la xiriirka kirystayaasha iyo milkiilayaasha kuna saabsanaa barnaamijyo badan oo ku saabsan xuquuqda kireystaha ku leeyahay magaaladeena.



CANSHUURDHAAF QOYSASKA BADAN

Cusbooneysiinta iyo ballaariintii barnaamijka Canshuur ka Dhaafinta Guryaha Qoysaska Badan (Multifamily Tax Exemption-MFTE) si loo abuurto guyo badan oo la awoodi oo lagu baahiyo xaafado kale oo magaalada oo dhan ah, iyo abuurista guyo nooca qoysaska badan degi karaan. Ilaa imika, 621 ayaan noqday guyo la awoodi karo oo diyaar ah sannadka 2016 oo ku yimid MFTE, sidoo kale waxa Magaaladu ansixisay guyo la awoodi karo oo dheeraad ah oo gaaraya 416 kuna jira dhismo.

Guryaha Khasabka ah ee la Awoodi karo [Mandatory Housing Affordability (MHA)] ee leh qaabka deegaanka iyo ganacsi + Dhaqan-gelinta Bulshada si loo abuurto Mabaadii'

Golaha Deegaanka waxa uu u ansixiyey MHA habka shaqo ee guyo degista iyo kuwa ganacsiga. Iyadoo la kaashanayo talada bulshada, waxannu aburnay qodobbo ku saabsan sida loo dalban karo qaabka shaqo ee guyo deegaanka ee MHA. Qormo ku saabsan jidka loo maro qodobbadaasi ayaa ku diyaarsan onleenka si dadku ra'yigooda uga bixiyaan kuwaasi oo sidoo kale laga heli karo kulmada ka dhaca magaalada.

Waxa la Sameyn Karo 2017

- + In La Ansixiyo Fursadda Guryo Loo Siman Yahay
- + Is si buuxda loo hirgaliyo Guryaha Ganacsiga iyo Deegannada MHA si hore loogu socdo goolkayaga ah 6,000 oo guryo cusub oo la awoodo
- + In hore loogu dhaqaaqo barnaamijkayaga sharciga gobolka
- + In la sii wado la xiriirka iyo la wada hadalka reer Seattle oo ku jeeda ciriirga ka jira guryaha



Awoodda ee guryaha ee waajibka

SIDA AAN U KORAAN AWOODDA DHISITAANKA

Barnaamijka MHA soo jeediyay waxuu xaqiijini doonaa dhismayaasha cusub ee ganacsiga iyo qoyska kale dhagan, waxaa ka mid ah guryaha la awoodi karo ama la bixiyo lacag dhinaca ee guryaha la awoodi karo, beddelkeeda kordhinaayo awooda horumarinta.

- + MHA waa qayb ka mid ah gorgortan ee la gaarey bishii Luuliyo 2015.
- + Bisha Novembar 2015, Guddiga magaalada ayaa ansixiyay qaab barnaamijka MHA-ganacsiga ku saabsan.



Horumarka qaab barnaamijka MHA-Residential ayaa hadda la ka shaqeynaya (eeg hoos).

Qaababka MHA waxey bixiyaan awood - iyagu ma ay hirgeliyaan barnaamijka. Dhamaan 2016, magaalada waxeey hirgeliyeen isbedel ku saabsan xuduuddadhulka

Xaafadda Jaamacadda (University District) , oo ay soo raacaan xaafadaha Faras Magaalada (Downtown) iyo Koonfurta Harada Midnimada (South Lake Union) waa meelaha ugu horreeya ee yeelan doona MHA. Kordhinta Sooneynta ama Xadeynta waxa ay u oggolaan doontaa iney u oggolaadaan in la dhiso guryo badan si dalabka loo haqab tiro, iyo iney awood u siiyaan Magaalada iney hirgeliso MHA iyadoo isticmaaleysa jidka Sharciga ah ee gobolku oggol yahay. MHA lagama filayo hareeraha xaafadaha kale ilaa 2017, ka dib markii shaqada la xiriirka bulshada dhamaato, iyo midda Warbixinta Saameynta Bey'adda (Environmental Impact Statement (EIS)). Xilliga Xagaaga ee 2016, Magaaladu waxa ay soo saari doontaa qormo khariidad ku saabsan sida muuqaalka xaafadaha magaalada u ekaan doono marka sooneyaasha ama xuduudaha wax laga beddelo.

LA soo xiriir: Geoffrey.Wentlandt@seattle.gov

Waxanu Dooneynaa inaan Adiga Kaa Maqalno

ONLEENKA

HALA.consider.it waa gogol onleen ah oo kuu oggolaaneysa inaad kaga qeyb qaadan karto adigoo guriga jooga iyo waqtigaaga kuu gaarka ah. Wada hadalka onleenka waxa uu muujinayaa koox fikrado ah waxaana uu kuu oggolaanayaa inaad ka faallooto, aadna fikrad ku raaci karto ama diidi karto. Waxa kale oo uu kuu oggolaanayaa inaad aragto waxa dadka bulshadaada ka yiraahdeen iyo aaraa' kale oo kala duwan. Sidoo kale inaad aragto waxa ay dadka xaafaddaadu ka yiraahdeen ilaa imika:

HALA.consider.it

SHAQSI AHAAN

Waxanu ka qeyb galnay sannadkan in ka badan 78 kulamo si HALA si sax ah ugu hirgasho. Nagu martiqaad kulankaaga!

halainfo@seattle.gov
206.743.6612



KU QORO JADWALKAAGA!

Kulamada Xilligan Xagaaga (fall) iyo Jiilaalka (Winter), waxan kaaga baahan nahay talooyin ku jeeda wejiga xiga ee HALA.

- + **NW Neighborhoods:**
Bitter Lake Community Center
Diseembar 3, 10am-12pm
- + **SW Neighborhoods:**
Shelby's Bistro and Ice Creamery
Diseembar 7, 5:30-7:30pm
- + **NE Neighborhoods:**
Ravenna Community Center
Diseembar 13, 6-8pm
- + **CENTRAL Neighborhoods:**
Optimism Brewing
Jannaayo 10, 6-8pm
- + **SE Neighborhoods:**
The Royal Room
Febraayo 4, 10am-12pm

Guryo oo cadaalad fursad ah

XAQIJJINTA GURYAHA EE CADAALADNIMO LAGU HELAAYO

Markii la qiyaaso dalka Mareykanka, mid ka mid saddex dad waaweyn ayaa ah dembiilo, iyo kala bar ku dhow dhammaan carruurta ay leeyihiin hal waalid oo dambili ah. Maaddaama ee isticmaalka baaritaanka dhanka dembiyada aad u kacday marka dadka kiraysanaya, dadka la xiro iyo la xukumay ayaa dareemo caqabadaha ugu waaweyn ee guryaha.

Xafiiska degmada Seattle ee Xuquuqda Dadweynaha ah ayaa isugu keene daneestayaal kala duman inay bixiyaan talooyin ku istaraatiyad-dejinta in wax laga qabto caqabadaha haysta dadka la xirey iyo xukun saran iyagu daryeela ee ganacsiga iyo amaanka

LA soo xiriir: Brenda.Anibarro@seattle.gov



Ra'yiga bulshada, Qoritaanka, iyo Baarinta

WAQTIGA

OKT 2016

NOV

DIS

JAN 2017

FEB

MAAR

Yoolka Sharci-yaqaannada Gobolka (Olympia)

Talo bixinta HALA waxa ay ugu yeerayaan dowladda gobolka in kordhiso dhaqaalaha si wax looga qabto dhibka awoodis la'aanta ka jirta Seattle. Shaqadu waa mid socota iyadoo lala kaashanayo hey'adaha kale ee dooda iyo magaalooyinka kale ee gobolka si loo dhiso barnaamij sharci dejin sal ballaaran kaasi oo kulminaya tiro fikrado ah oo ku jeeda meelgelin iyo siyaasado si looga abuurto Seattle guryo qiimahooda la awoodo.

LA soo xiriir: Loren.Othon@seattle.gov



Youngstown Flats



Barnaamijka Xafidaadda Guryaha

XAFIDAADDA FURSADAHA GURYAHA QIIMAHOODA LA AWOODO EE IMIKA JIRA


Waaxaha Magaalada waa ay wada shaqeynayaan si loo abuurto qorshe dheer oo lagu xafidayo guryaha. Tabaha lagu xafidayo guryaha waxa ka mida:

- + In guryaha imika jira ay la wareegaan hey'adaha samofalka/iyo kuwa bulshada u adeega, oo ay taageereyso MHA, canshuurta guryaha iyo maaleginnada kale.
- + In la dhiirigeliyo kirada iyo dakhliga gooni loo soocay ee suuqa gaarka ah (tusaale, in la joogteeyo canshuur dhaafka, iyo maalgelinta dhaqan celinta).
- + In la taageero Xafidashada Milkiilayaasha (tusaale, dayactirka guryaha, amaahda iyo deeqda, guryaha qof qofka oo jawigooda la waafajiyo).

LA soo xiriir: Emily.Alvarado@seattle.gov

Abuuris Xaalad Noolaansho

In diiradda la saaro korriimada magaalooyinka waxa ay la macno tahay in beeraha iyo dhirta inay dhammaan ina siinayaan raashin, meelo wax naga soo galaan iyo dhul lagu mushaaxo.




In la aburo xaafado ay dadku si sahlan ah ku heli karaan dhammaan waxyaabaha ay u baahan yihiin waxa ay sahleysaa socodka, baaskiilka iyo isticmaalka gaadiidka dadweynaha.



SEATTLE LAGU NOOLAAN KARO

In guryo badan loo dhiso dhammaan dadka dhaqalhoodu kala duwan yahay, waxa ay magaaladu ka dhigeysaa mid loo siman yahay, oo leh dhaqamo



Inaannu maalgelinno iyo inaannu horumarinno beeraha ee nasiinada ee quruxda badan, jardiinooyinkeena iyo dhirta waxa ay ina siineysaa meelo aannu ku nasanno iyo ku ciyaarno iyadoo aanu isla markaana nadiifineyno hawadeena iyo biyaheena.

Cusbooneysiinta iyo dayac tirka beeraha nasiinnada ee sanadka 2016ka.


- Broadway Hill Park
- 12th Avenue Square Park
- Mount Baker Park
- Gilman Playground
- Sam Smith Park
- Cedar Park
- Webster Park
- Licton Springs Park
- Discovery Park
- Lincoln Park

www.seattle.gov/parks/about-us/policies-and-plans



IN DIIRADDA LA SAARO KORRIIMADA MAGAALOOYINKA WAXA AY U WANAAGSAN TAHAY CIMILADA

Seattle way koreysa waxana ay yareneysaa sii deynta qiica iyadoo isa soo koobeysa, in la helo dhismayaal tayo wanaagsan, iyo gaadiidyo noocyo kala duwan ah.



www.seattle.gov/environment/climate-change



